



Nala wadaag ra'yigaaga ku saabsan naqshadaha iyo farshaxanka Boosteejada Franklin Avenue!

Haddii aad seegtay Kulankii Dadka dhan u furnaa oo looga arinsanayay Dayactirka Boosteejada Franklin Avenue ee Maarso 2026 oo aad jeclaan lahayd inaad dib u eegto naqshadda la soo jeediyay oo aad ka bixiso war-celin sifooyinka boosteejada iyo farshaxanka dadweynaha, fadlan ka qayb qaado [ra'yi uruurinta onlaynka ah](#). Ra'yi uruurinta wuxuu furnaan doonaa ilaa iyo Oktoober 9. Agabyadii lagu wadaagay kulankii dadka dhan u furnaa iyo macluumaadka ku saabsan wajiyadii hore ee ka-qaybgalka bulshada ayaa laga heli karaa [websaydka mashruuca](#).

Ku saabsan mashruuca

Leenka Buluuga Metro ee Boosteejada Franklin Avenue, ee la furmay 2004, waxaa ku socda dayactir weyn si wax looga qabto kaabaha duugoobay, cilada sida joogtada ah ugu imaada wiishka, waxyaabaha ka dhamaaday, iyo walaacyada ka dhanka ah badqabka ee ay qabto bulshada.

Mashruuca Dayactirka Boosteejada Franklin Avenue wuxuu higsanayaa inuu dayactiro boosteejada si uu si wanaagsan ugu adeego bulshada iyadoo la hagaajinayo marin u helida, xoojinta khibradda macaamiisha, dhimida baahiyaha dayactirka, iyo kordhinta isku xirnaanta. Qayb ka mid ah dadaalkan, waxaan la shaqeyneynaa bulshada si aan u hubinno in naqshada boosteejadu ay ka tarjumayso xaafadda iyo dadka ay u adeegto.

Jadwalka Mashruuca

Naqshadeynta waxay bilaabatay dayrtii 2025. Dhismaha waxaa loo qorsheeyay inuu bilaabmo guga 2027.

Ahoow xog ogaal

Ma danaynaysaa mashruuca? Waxaan jeclaan lahayn inaan dhagaysano fikradahaaga. Kala xiriir kooxda mashruuca ciwaanka franklin@metrotransit.org.

Haddii aad u baahato macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca, booqo [websaydka mashruuca](#).